

SAN DIEGO UNIFIED SCHOOL DISTRICT

Tilmaamaha Buuxinta Foomka Diiwaangelinta Ardeyda PK- 12aad



Fadlan waxaad si dhammeystiran u soo buuxisaa Foomka Diiwaangelinta Ardeyda ee Xanaanada ilaa iyo 12aad, waxaadna ku soo qortaa qaliimo khad madow ama buluug ah leh. Khaanada kasta oo ku taal qeybaha I – IV buuxi, kedibna saxiix foomka b.2. Waxaad xusuusnaataa in warbixinada aad ku qorto khaanadaha 3 iyo 12 caddeymo lagaaga baahan yahay ee loogu talagalay diiwaangelinta cusub ee dugsiga.

QEYBTA I: WARBIXINTA ARDEYDA	
Khaanadaha 1-2	Khanaadahaas XAFIISKA oo KELIYA ayaa isticmaaleya. Wax warbixin ah ha ku qorin khaanadahaas.
Khaanada 3. Magaca Sharciyanka ah ee Ardeyga	Waxaad ku qortaa Magaca Sharciyanka ah ee Ardeyga (sida ku qoran shahaadada dhalashada iyo waraaqaha kale ee sharciga ah): Magaca Awoowga, Magaca Ardeyga/Magaca Haba oo la soo gaabiyey, iyo Horgalka (Jr, II, III). XUSUUS: Magaca Sharciyanka ah ee Ardeyga iyo taariikhda dhalashada waa inuu qof shaqaalaha xafiiska ka mid ah soo caddeeyaa. Foomamka cadenita waxaa ka mid ah shahaadada dhalashada, warqada marag-kaca, diiwaanada kiniisada, ama baasaboorka.
Khaanada 4. Naaneysta Ardeyga	Waxaad ku qortaa magaca uu ilmahaagu isticmaalo haddii uusan isticmaalin Magaca Sharciyanka ah ee Khaanada 3 ku qoran. Tusaale ahaan: Ardeyga la yidhaahdo Eleanor waxaa laga yaabaa inay isticmaasho naaneysta ah Ellie.
Khaanada 5. Magacyada Kale ee horey loo isticmaaley	Waxaad ku qortaa magaca uu ilmahaagu horey u isticmaaley ama inuu kaa ka duwan yahay ah ee aan ahayn kan Khaanada 3 ku qoreyn. Tusaalooyinkaas waxaa ka mid ah magaci sharciyanka ee hore ama magaca guurka.
Khaanada 6. Taariikhda Dhalashada	Waxaad ku qortaa taariikhda dhalashada ee ilmaha adiga oo isticmaaleya ama u kala horeysiineya sidatan bisha/maalinta/sannadka.
Khaanada 7. Nambarka Daryeelka Bulshada ee Ardeyga	Waxaad ku qortaa Nambarka Daryeelka Bulshada ee ILMAHA. Haddii uusan jirin iska daa ha iska bannaanaate.
Khaanada 8. Jinsiga Ardeyga	Waxaad ku calaamadeysaa Lab (M) ama Dheddig (F).
Khaanada 9. Jinsiyadiisu tahay Hisbaanik ama Laatiino	Waxaad hal khaanad ah ookeliya ku muujisaa "Haa" iyo "Maya" haddii uu ilmuhu Hisbaanik ama Laatiino yahay.
Khaanada 10. Jinsiyada	Waxaad isu nisbeyn kartaa hal jinsiyad ama in ka badan jinsiyadaha meesha ku taxan.
Khaanada 11 Telefoon nambarka Guriga.	Waxaad ku qortaa telefoonka guriga uu ilmuh deggan yahay. Waxaad raacisaa raqamka telefoonka.
Khaanada 12. Ciwaanka Qoyska	Waxaad ku qortaa ciwaanka uu ilmuhu deggan yahay, taas oo aad raacinasid magaalada, dawlad-goboleedka, iyo raqamka. XUSUUS: Ciwaanka waa inuu hubiyaa qof shaqaalaha xafiiska ka mid ah.
Khaanada 13. Ciwaanka Waraaqaha loogu soo direyo	Haddii aad leedahay ciwaanka kale oo aan ahayn ciwaanka qoyska ee Khaanada 12 ku qoran, waxaad halkan ku qortaa ciwaanka kale.
Khaanada 14. Magaalada iyo Dawlad-goboleedka uu ku dhashay	Waxaad ku qortaa magaalada iyo dawlad-goboleedka uu ardeygu ku dhashay.
Khaanada 15. Waddanka uu ku dhashay	Waxaad ku qortaa waddanka uu ardeygu ku dhashay.
Khaanada 16. Marka Koowaad ee Diiwaangelinta Dugsiga California (X-12)	Waxaad ku qortaa taariikhda markii koowaad ee uu ilmahaagu iska diiwaangeliyey dugsiyada California ee Heerarka fasalka X-12. Haddii uu ilmahaagu uu Xanaanada galay, waxaad qorta maalintii koowaad ee dugsiga.
Khaanada 17. Markii Koowaad ee Dugsiyada Maraykanka laga Diiwaangeliyey (X-12)	Waxaad ku qortaa taariikhda markii koowaad ee ilmahaaga dugsiyada Maraykanka laga diiwaangeliyey ee Heerarka Fasalka X-12. Haddii uu ilmahaagu uu Xanaanada galay, waxaad qorta maalintii koowaad ee dugsiga.
Khaanada 18. Xaalada Deegaanka ee Ardeyga	Waxaad calaamadeysaa HAL khaanada oo si wanaagsan u sheegeysa meesha uu ilmuhu deggan yahay. Haddii uu ilmuhu ku Guryaha Carruurta Lagu Barbaariyo ama Machadyada Laysanka leh ee Carruurta lagu hayo (LCI), waxaad soo qortaa nambarka laysanka ee goobtaas ilmaha lagu hayo.

QEYBTA II: Warbixinta Carruurta Walaalaha ah	
Khaanada 19. Da'da Dugsiga ee Carruurta Walaalaha ah	Haddii ay jiraan carruur kale oo hada dugsiga ka diiwaan gashan (ama iska diiwaan gelin doonta sannad-dugsiiyeedka soo socda) mid ka mid ah Dugsiyada San Diego Unified Schools ee fasalka X- 12aad, waxaad ku qortaa magaca oo dhan, heerka fasalka, iyo magaca dugsiga. Haddii aad rabtid inaad magacyo dheeraad ah qortid, waxaad isticmaashaa Xusuusaha ama khaanada Warbixinada Dheeraadka ah ee Qeybta V ku taala.

QEYBTA III: Warbixnada Xidhiidhada	
Khaanada 20. Warbixinada Waalidka iyo Qofka Ardeyga masuulka ka	Waxaad ku qortaa warbixinada meelaha uu dugsigu waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah kala xsoo xidhiidhi karo. Tanu waa meesha koowaad ee lagala soo xidhiidheyo. <ul style="list-style-type: none"> • Qofka lala xidhiidheyo mahgaciisa oo dhan: Waxaad ku qortaa magacaaga oo dhan. • Waxa aad ilmaha u tahay: Waxaad ku qortaa waxa aad ardeyga u tahay (Hooyo, Aabbe, Qofka sharciyanka ilmaha masuulka ka ah). • Ardeyga meel ma la deggan yahay?: Goobaabin geli Haa ama Maya. Halkan ku qor.Haddii ciwaanka aad deggan

ah	<p>tahay uu ka duwan yahay kan qoyska ardeygu deggan yahay ee khaanada 12 ku qoran.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Telefoonada Guriga, Shaqada, gacanta: Waxaad ku qortaa Namborada telefoonada guriga, shaqada, iyo kan gacanta (waa ikhtiyaariyo). Waxaad raacisaa khadadka loo gudbineyo, haddii loo baahan yahay. • Ciwaanka E-Mail : EWaxaad ku qortaa ciwaanka e-mail ee gurigaaddress (waa ikhtiyaariyo). Waxaa ku weydiin doona xubnaha shaqaalaha dugsiga qof ka mid ah. • Cidda aad u shaqeyso: Waxaad ku qortaa magaca cidda aad u shaqeyso ama ganacsiga. • Luuqada Koowaad ee lagugula soo xidhiidhi karo: EWaxaad ku qortaa luuqada AFKAAGA hooyo. <p>Heerka Waxbarashada: CWaxaad ku qortaa heerka ugu sareeya ee aad waxbarashada ka gaadhey ee dugsig kasta. Mid keliya goobaabin geli.</p> <p>NHS =Aan ka Qalin jebin dugsiga Sare HS = Dugsi Sare ka qalinjebiyey SC = Xoogaa Shahaadada Kulleejada ah ama Shahaadada AA C = Kulleejada ka qalinjebiyey G = Shahaadada Labaad ee Jaamacadda DEC = Ka gaabsasho inaad ka jawaabtid/Aan rabin inaad ka jawaabtid</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ku Calaamadee: Dhammaan meelaha ku habboon oo dhan goobaabin geli.. <p>INT = Waxaad u baahan doontaa qof tujubaan ah si aad ula soo xidhiidho dugsiga iyo macallimiinta ilmahaaga wax u dhiga. PC = Waxaad u baahan doontaa inaad imaanshaha ilmaaga ee dugsiga iyo warbixinada la xidhiidha buundooyinkiisaba aad ka heshid Internetka ma aonline adiga oo isticmaaleya XidhiidhkaQoyska/ParentConnection/ (haddii uu dugsigu bixiyo). AM: Hada mileteriga ka tirsan</p>
Khaanada 21. Waalid ama Qof ardeyga masuul ka ah oo kale	<p>Waxaad ku qortaa warbixinada kale ee waalidka, adeerka, ama qofka ilmaha sharciyan masuulka ka ah si dugsiga loo siiyo cid uu la soo xidhiidhi karo. Waxaad si dhammeystirran u buuxisaa sida khaanada 20 oo kale.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Calaamadaha Dheeraadka ah: Calaamadahaasu waxay fasax u siiyaan waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah inuu heli karo warbixinada ku saabsan diiwaanka ardeyga. Waxaad goobabin gelisa meesha ku habboon. <p>RC = Xidhiidhkanu wuxuu u baahan yahay nuqul kaadhka warbixinta ee ilamaha ah. Marka uu fulin waayo arrinkaas sharciyeed, waxaad loo gudbineyaa qofkii koowaad ee xidhiidhka lala lahaa. PR = Xidhiidhkanu wuxuu u baahan yahay nuqul kaadhka warbixinta ee ilamaha ah. Marka uu fulin waayo arrinkaas sharciyeed, waxaad loo gudbineyaa qofkii koowaad ee xidhiidhka lala lahaa INT, PC iyo AM Fadlan fiiri Khaanada 20.</p>
Khaanda 22. Dadka lala xidhiidheyo Xaaladaha Deg degga ah	<p>Waxaad ku qortaa qofka telefoon lagula xidhiidheyo marka ay xaalada deg deg ah dhacdo oo waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah telefoon lagu waayo. Waxaad ku qortaa qofkaas magacaaisa oo dhan, wax uu aredyga u yahay, namborada telefoonadiisa, luuqadisa hooyo, Xusuus: Haddii aad u baahan tahay inaad ku darged dad dheeraad ah oo lala xidhiidhi karo, waxaad isticmaashaa qeybta V ee khaanada Warbixinada.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Calaamadaha Dheeraadka ah: Calaamadahaasu waxay fasax u siiyaan waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah inuu heli karo warbixinada ku saabsan diiwaanka ardeyga. Waxaad goobabin gelisa meesha ku habboon. <p>RC = Xidhiidhkanu wuxuu u baahan yahay nuqul kaadhka warbixinta ee ilamaha ah. Marka uu fulin waayo arrinkaas sharciyeed, waxaad loo gudbineyaa qofkii koowaad ee xidhiidhka lala lahaa. PR = Xidhiidhkanu wuxuu u baahan yahay nuqul kaadhka warbixinta ee ilamaha ah. Marka uu fulin waayo arrinkaas sharciyeed, waxaad loo gudbineyaa qofkii koowaad ee xidhiidhka lala lahaa INT iyo PC Fadlan fiiri Khaanada 20.</p>

QEYBTA IV: Su'aallo loogu talagalay Waalidiinta ama Dadka ardeyda masuulka ka ah	
Khaanada 23-29.	Fadlan waxaad buuxisaa su'aalaha 23-29 adiga oo ku calaamadeynaya Haa iyo Maya.
Saxiix iyo Taariikh	Foomkan soo saxiix oo taariikhda ku soo qor.

SECTION V: District Administrative Information—FOR OFFICE USE ONLY	
Boxes 30-41	These are for OFFICE use ONLY (unless you use the Notes/Additional Information section to list additional information from Sections II or III).

**QEEIXITAANKA JINSIGA IYO ASALKA EE LOOGU TALAGALAY KAADHKA
DIIWAANGELINTA FASALADA PK-12**

Kaadhka Diiwaangelinta ee fasalada PK-12 ee loogu talagalay 2009-10, waxaa lagu soo daray *Su'aasha #9*, waxaana la beddelay *Su'aasha #10*. Waxaad isticmaashaa qeexitaanka halkan hoose lagu sameeyey, si ay kaaga caawiso marka aad foomka buuxineysid.

<p><i>Su'aasha #9:</i> Waxaad ku jawaabtaa “haa” ama “maya” marka loo baahdo.</p> <p>Hisbaanik ama Laatiino: Waa qofka Kuubaanka, Mekisikaanka, Boorto Rikaanka, Koonfurta iyo Badhtamaha Ameerikaanka ama kuwo kale oo ku asal leh dhaqanka Isbaanishka, iyada oo aan jinsiyada ahaan loo fiirin.</p>
<p><i>Su'aasha #10:</i> Waxaad ikhtiyaar ahaa u doorataa mid ama in ka badan oo jinsiyadahan hoostan ku qoran ah~</p> <p>Qeexitaanka Jinsiga:</p>
<p>Hindida Ameerikaanka ah ama Asalkiisu Alaaska yahay: Waa qofka asalkiisu ka soo jeedo Waqooyiga iyo Koonfurta Maraykanka (waxaa ku jira badhtamaha Maraykanka), kuwaas oo qabiil ahaan ama jaaliyad ahaanba loo aqoonsadey inay dhaqan la wadaagaan.</p>
<p>Hindida Eeshiyaanka ah: Waa qofka asal ku leh mid ka mid ah dadyowga Hindiya.</p>
<p>Madowga iyo Afrikaan Ameerikaanka: Waa qofka asal ku leh mid kasta oo ka mid ah kooxaha madow ee Afrika.</p>
<p>Kaamdoodhiyaan: Waa qof kasta oo asal ku leh dadyowga Kaamboodhiya.</p>
<p>Shiineys: Waa qofka ku asal leh mid ka mid ah waddamadan soo socda: (Mainland) Shiinaha, Taaywan, Hoong Koong.</p>
<p>Filibiino: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah Jasiiradaha Filibiin.</p>
<p>Guwaameniyaan: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah Jasiiradaha Gu'aam.</p>
<p>Hawaiian: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah Jasiiradaha Hawaii.</p>
<p>Moon: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah Jasiiradaha Laa'ooos, oo dhaqan ahaan iyo asal ahaanba Moon ah.</p>
<p>Jabaaniis: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah Jasiiradaha Jabaan.</p>
<p>Kuuriyaan: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah Jasiiradaha Kuuriya.</p>
<p>Laa'ooshiyaan: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah Jasiiradaha Laa'ooos.</p>
<p>Eeshiyaanka Kale: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah dadyowga waddamadan soo socda: Barma, Malaya, Taaylaandh, Sirilaanka, Indhooneeshiya, Miyeen, Singaaboor, Bangaladesh, Butaan, Nebaal, Baakistaan, iyo dalal kale oo Eeshiyaan ah oo aan halkan lagu xusin.,</p>
<p>Baasafik Aaysilaandherka Kale: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah dadyowga Baasafik Aaysilaandherka Kale ee aan ahayn Hawaii, Guaam, Samoo'a (Samoo'aanka Ameerikaanka ah iyo Galbeedka Samoo'a) ama Taahiti. Waxaase ku jira jasiiradaha kala ah sida Boolonesiya, Jasiiradaha Fiji, Jasiirada Marshall, Meleneeshiya, Baaluu, Toonga, Tiruk ama Yaab.</p>
<p>Samoo'an: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah dadyowga Samoo'a (Samoo'aanka Ameerikaanka ah iyo Galbeedka Samoo'a)</p>
<p>Tahishiyaan: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah dadyowga Taahiti.</p>
<p>Fiyetaamiis: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah dadyowga Fiyetnaam.</p>
<p>Cadaan: Waa qof kasta oo ku asal leh mid ka mid ah dadyowga Yurub, Bariga Dhexe, ama Waqooyiga Afrikat</p>